CHILDREN'S AID SOCIETY *of* TORONTO

LA SOCIÉTÉ DE L'AIDE *à* L'ENFANCE DE TORONTO

Masuuliyadaha Hay'adda Kaalmada Carruurta ee Toronto iyo Xuquuqda Macmiilka

Waa maxay masuuliyadaha hay'adda Kaalmada Carruurta ee Toronto?

Ilaalinta carruurtu waa masuliyaddayada kama dambeysta ah. Waxa awood sharci noo siiyey Xeerka Adeegyada Ilmaha iyo Qoyska (Ontario) inaanu soo farogalino xaalad kasta oo ilmo kayar 16 jir oo Toronto ku nool lagu handaday, ama lagu handadayo, waxyeelo jireed ama niyadeed, xadgudub galmood, ama dayac.

Waa maxay adeegyada CAS ee Toronto ay bixisaa?

Adeegyada maaraynta ilmaha oo leh taageero qoys, daryeel barbaarin, kooxaha dhibbanayaasha xadgududbka galmood, korsashada iyo caawinta haweenka uurka leh. Sidoo kale waxaanu ku xirnaa dadka adeegyada kale ee ka jira bulshada dhexdeeda.

Maxaa dhacaya marka warbixin la sameeyo?

Waalid ama ilmo ayaa si toos ah noo soo wici kara. Qaraabo, saaxiib, macalin, kalkaaliso caafimaadka dadwaynaha, dhakhtar ama xirfadle kale oo bulshada ka tirsan ayaa samayn kara gudbinaha.

Haddii qofi sheego ilmahaaga in la waxyeelo ama la dayaco, hawlwadeen CAS ee Toronto ah ayaa booqan doona qoyskaaga si uu u go'aamiyo haddii waxyeeleyn dhacday. Haddii hawlwadeenku u maleeyo ilmahaagu inuu halis kujiro, waxa khasab ah inuu go'aamiyo si loo ilaaliyo ilmaha qoyskana loo caawiyo. Hawlwadeenku waxa dhici karta inuu kuu soo bandhigo adeegyo taageero, ama go'aamiyo inuu si kumeel gaar ah ilmahaaga guriga uga kaxeeyo.

Haddii ilmuhu u muuqdo inay ku soo fool leedahay halis dhow, sida kaliya ee loo hubin karo badbaadadiisuna tahay in guriga laga kaxeeyo, sidan waxa la yeeli karaa haddii aad oggoshahay iyo haddii aanad oggolayn labada. Kadib ilmaha waxa la geeyaa jawi badbaado leh, sida saaxiib qoyska, qaraabo ama guri barbaarin.

Sidee ayey qoysaska iyo CAS ee Toronto u wada shaqeeyaan?

Carruurtu waxay u yimaadaan daryeelka CAS ee Toronto sababo kala duwan. Waalidiintoodu waxa dhici karta inayna awoodin inay u daryeelaan si badbaado leh, taageerooyinka kale sida la-talinta ama waxbarashadu ay waxtari waayeen ama aanay jirin, oo saaxiibada iyo qaraabaduna ayna caawin karin.

Ilma kasta oo la geeyo daryeelka, in lix ka badan oo kale ayaa guryahooga loogu adeegaa. Carruurta qaarkood waalidiinta ayaa si iskood ah noogu keena, halka qaar kalena amar maxkamadeed na loogu keeno. Mararka qaar, waxa dhici karta inay ugu fiican tahay in ilmaha lagu keeno si iskaa ah. Tan waxa la sameeyaa wakhti xaddidan, iyada oo la haysto oggolaanshahaaga iyo oggolaanshaha ilmahaaga, haddii uu yahay 12 sano ama ka weyn.

Haddii ilmahaaga laga qaado guriga adiga oon ka raalli ahayn, garsoore ayaa go'aamin doonaa waxa ay tahay inay dhacdo marka xiga. CAS ee Toronto waxa khasab ah inay soo hordhigaan xaaladda garsooraha Maxkamadda Qoyska muddo shan maalmood gudahood. Garsooruhu wuxuu ka qaadan go'aan haddii ay tahay ilmuhu inuu sii joogo daryeelka CAS of Toronto ama guriga ku laabto. Waxa aad qabsan kartaa garyaqaan si uu kaaga caawiyo maxkamadda. Haddii aanad qabsan karin, waa inaad waydiisato kaalmo xafiiska gargaarka sharciga.

Waa maxay xuquuqda ilmuhu?

- Xaqa kaqaybqaadashada go'aanada muhiimka ah ee laga qaadanayo noloshooda oo ay uga qaybqaataan qaab ku habboon da'dooda iyo awooddooda

dheeraad...

(....sii socda)

Masuuliyadaha Hay'adda Kaalmada Carruurta ee Toronto iyo Xuquuqda Macmiilka

- Xaqa asturnaanta
- Xaqa inuu ku soo booqdo, haddii usan garsoore go'aamin ama amar maxkamadeed la siiyo hawlwadeenka CAS, inayna ahayn danaha ugu fiican ee ilmaha
- Xaqa inuu helo daryeel habboon, oo ay ku jiraan cunto nafaqo leh, waxbarasho ku habboon awooddiisa, daryeel caafimaad iyo ilkeed oo joogto ah, dhar da' ahaan ku habboon, iyo ka qaybqaadashada hawlaha madadaalo ee dugsiga kadib
- Xaqa inuu xor ka ahaado waxyeeleyn jireed ama ciqaab, iyo waxyeeleyn niyadeed, galmo, iyo hadal
- Xaqa inuu ku dhaqmo diintiisa, iyo inuu helo barasho diimeeed
- Xaqa ka qaybqaadashada hawlaha u muhiim ah dhaqankiisa iyo hiddihiisa
- Xaqa inuu helo qaddarintiisa qofnimo, oo ay ku jiraan awoodda, doorashada nooca galmo, iyo aqoonsiga jinsiga

Waa maxay xuquuqda waalidku?

CAS ee Toronto waa inay samayso dadaal macquul ah si ay kuu ogeysiiso wax kasta oo ku lug leh maxkamad. Haddii garsooraha Maxkamadda Qoysku go'aamiyo ilmahaagu inay khasab tahay inuu joogo daryeelkayaga, CAS ee Toronto waa inay ku ogaysiiso kuuna oggolaato inaad ka qaybqaadato go'aanada muhiimka ee saamaynaya ilmahaaga. Waa inay sidoo kale jirtaa awood yeelasho macquul ah ee helitaanka macluumaadka qaar ku jira faylashada CAS of Toronto.

Qorshe ayaa la abuuri doonaa si loo iftiimiyo waxa ay khasab tahay in qof kastaa sameeyo si loo hubiyo ilmahaagu inuu natiijada u fiican helo, hadday tahay inuu sii joogo daryeelkayaga muddo, ama ku laabanayo guriga.

Waxa aad ilmahaaga u booqan kartaa si gaar ah, ilaa qarsoore ama hawlwadeenkaaga CAS ee Toronto iyo/ama hawlwadeenka ilmahaaga ee CAS ee Toronto isagoo isticmaalaya amar maxkamadeed, uu u arko inayna ahayn danaha ugu fiican ee ilmahaaga.

Booqashooyinkan waxay ka dhici karaan gurigaaga, bulshada dhexdeeda, ama goobta ilmahaagu ku nool yahay.

Adiga iyo hawlwadeenkaaga CAS ee Toronto (iyo ilmahaagu haddii uu wayn yahay) waxa aad ka xaajoon doontaan goorta, goobta, iyo sida ugu badnaan u booqan karto.

Diiwaanada CAS ma qarsoodibaa?

Haa. CAS ee Toronto waa inay hayso diiwaanada saxda ah ee dhammaan la xiriira carruurta iyo qoysaskooda si aanu u diiwaan garayno hawshayada, una ururino macluumaadka muhiimka ah si aanu u caawino qoyskaaga. Diiwaanada oo dhan waa qarsoodi, shaacinta waxa ku qoranna si adag ayaa loo maamulaa.

Waxa aad xaq u leedahay in:

- aad dib-u-eegto oo aad fahamto diiwaankaaga
- aguu sharxo diiwaanka
- aad raadiso sixitaano

Maxaa dhici kara haddii ay jiraan tabashooyin adeegga CAS ee Toronto?

Haddii ay dhibi jirto, wax kasta ayaanu samayn si aanu u xallino. Fadlan ha ka cabsan inaad la hadasho hawlwadeenkaaga CAS haddii aad qabto wax su'aalo ama tabashooyin ah.

Haddii adiga iyo hawlwadeenkaaga CAS aad xallin kari waydaan, codso inaad la hadasho kormeeraha CAS. Waxa aanu u leenahay waayo-aragnimo hore in arrimaha badankooda sida badan gobtan lagu xalliyo. Hase yeeshee, haddii adiga, hawlwadeenkaaga bulsho, iyo kormeeruhu aad xallin kari waydaan dhibaatada, CAS waxay leedahay dariiq dacwadeed oo toos ah kaasi oo laguu sharxi doono. Waxa aad codsan kartaa nuqul qoran oo ah dariiq dacwadeedka marka aad doonto.